# Fahmida Bulshooyinka LGBTIQ: Hadafka Aqbalaada iyo Ka mid ahaanta

AGMC
Australian GLBTIQ Multicultural Council

SOMALI ¦ SOOMAALI

## Eraybixino

Erayada "LGBTI" ama "LGBTIQ" waxaa laga isticmaalay wadama kala duwan si loo sharxo in dadweyne ka kooban dad isugu yeera inay yihiin:

- Naag naag ka hesha
- Nin Nin ka hella
- Nin naagtana ka hella ninkana ka hella
- Qof wuxuu u dhasahy aan isu arag iyo kala duwanaanta sinjiga
- Qof sinjiguu u muuqdo ka duwan xagga samayska (labeeb)
- Qof aan lab iyo dhadig midna sheegan

*Laakiin maxaa erayadas macnahoodu yihiin?*

Halkan waxaa ku yaalla sharaxaada erayga "LGBTIQ" si laguu caawimo inaad fahamto macneheeda:

**Naagnaag ka hesha:** waa eray lagu sharxo naag jecel naag kale. Naagahaas waa laba naagood isutaga lehna xiriir ay ka go'an tahay. Naagaha noocaas ah (lesbian) waxay leeyhiin carruur carruurtooda ayayna korsadaan sida qoysa kale oo kasta.

**Nin-Nin u taga:** waa eray sharxaya nin ka hella nin kale. Dumarka qaarkood ayaa iyaga naftoodu isugu yeera Gay halkii ay isu yeeri lahaayeen Lesbian taasna dhib uma arkaan. Ragga isu taga (Gay) waa laba nin oo is-rabba waxayna leeyihiin cilaaqaad adag wayna ka go'an tahay. Sida kan dumarka oo kale. Sida naagaha isu tagga (lesbian) nimanka isu tagaa (Gays) waxay leeyihiin carruur iyagaana korsada carruurtooda sida qoys kasta oo kale.

**Labeeb:** wuxuu khuseeyaa dadka jecel ragga iyo dumarka labadaba. Waxay la yeellan karaan cilaaqaad kalgacal ragga iyo dumarka. Dadka qaarkood waxay u malaynayaan in labeebku in aanu mid ku ekaan karin. Taasi run maaha. Waa ogyihiin cidday ka hellaan iyo cidday jecel yihiin.

Waa laga yaabaa inaad maqashay qof sinji walba ka hella "pansexual". Halka erayga labeebku (bisexual) badanaa macnihiisu yahay inaad jeclaato nin ama naag, pansexuals waxay jecel yihiin qof walba iyada oo aan ku xirnayn sinjigooda iyo waxay ka hellaan. Fahamka faraqa u dhexeeya labada wuxuu noqon karaa wax lagu wareero. Muhiim bay noo tahay in aan ixtiraamno waxay yihiin, oo aan aynaan cunsuriyadayn iyaga keliya cilaaqaadkooda ay nagaga duwan yihiin darteed.

**Trans ama transgender:** eraygaani wuxuu ka hadlayaa dadka u dhashay nin ama naag, laakiin dareemay inay ka tirsan yihiin sinji kale. Xaalkaan, qof u dhashay nin laakiin dareemaya inuu yahay naag waxaa loogu yeerayaa naagey-nimood-. Sidoo kale, haddii qof u dhashay naag laakiin doonaya inay yihiin rag, waxaa loogu yeerayaa nimaw-naageed.

Dad badan ayaa u malaynaya dadka dhinac u soo wareegay inay jaahwareersan yihiin ama qabaan jiro maskaxeed. Taasi run maaha. Dadka dhinac ka yimid waa ogaayeen cidda ay yihiin ilaa intii ay yaraayeen. Intaas ka sokow, Ururka Caafimaadka Adduunka (World Health Organisation) ma rumaysna in nimaw-geedka ama naagey-nimoodku qabaan jiro. Bulshada soo wareegaa ama gudbaa ma laha mid la ah xuquuqda qof kasta oo kale.

**Kala-duwanaanta Sinjisga:** waa eray lagu sharxo dadka aan dareemin inay yihiin nin ama naag, ama mid isbedelay. Sababtoo ah ma dareemaan in sinjigoodu uu raaco qeexitaanka nimeed, naageed ama gudub. Waa ogyihiin waxay yihiin, waana ku qanacsan yihiin sinjigooda. Sida gudbida, sinji dhaanka, waxayna la xuquuq yihiin qof kasta oo kale.

**Labeebku:** it waa xaallad jireed taas oo qof aan loo aqoonsan karin nin ama naag. Waa dabiici, taas oo macneheedu tahay sidaas ayay u dhasheen. Carruur badan oo labeeba ayaa lagu sameeya qaliin sababtoo ah dhakhtarka iyo waalidiintu waa inay wax ka qabtaan. Taasi waxay abuuri kartaa dhiba nafsadeed sababtoo ah waxaa loo sheegay maalintii ugu horraysay in wax ka qaldan yihiin jirkooda. Malta ayaa ah wadanka keliya oo aan ogolayn in qaliin lagu sameeyo labeebka. Shakhsiyaadka labeebka ah waa in loola dhaqmaa qadarin ku salaysan xuquuqda aadanaha; mana aha in la takooro qofka ay yihiin darteed.

**Queer:** Kani waa eray Ingiriis ah loo isticmaali jirey dadka qaarkiis si ay ugu sheegaan kuwa kale in aanay ahayn qof cagsigiisa daneeya. Taas macneheedu waxa weeye, halkii ay ugu yeeri lahaayeen naftooda nin ninka ka hella, naag naagta ka hesha, ama mid labadaba ka hella, waxay isugu yeeraan queer. Dhib ma leh haddii aadan hubin macnaha eraygaas, sababtoo ah si fiican uma tarjumayo luqadaha kale. Waxaad u baahan tahay inaad xasuusato marka qof yiraahdo waxaan ahay queer waxay kuu sheegayaan in aanay ahayn kuwa hella kuwa cagsigooda ah, taasina dhib maaha. Dadka Queer-ka ah, sida dumarka dumarka ka hella, sida ragga ragga ka hella, sida kuwa wax walba ka hella, sida kuwa bedelay sinjigooda, kuwa wax walba sameeya waa inay u noolaadan takoorid la'aan.

## Waa maxay sinji, waana maxay jinsi? Sidee kuwaasi uga duwan yihiin nin/naagnimada?

Waxay noqon kartaa mid jaahwareer leh si looga saaro erayga "sinji" "jinsi ahaanta". Halkaan waxaa ku yaalla sharaxaada erayadaan:

**Sinji:** waxaa looga jeedaa barashada noolaha. Waxay ahaan kartaa mid jireed ama hido (lab=xy karoomasom dhediguna= XX karoomasoom). Si kasta ha ahaatee, waxaa jira dad biology-goodu aanu raacin biology-ga dhadiga iyo labka. Sidaan aan horay uga hadalay, labeebku waa dadka abuuritaanku aanu ahayn dhadig iyo labood midna, waana xaallad dabiici ah mudana in loo aqbalo jir aadami ahaan.

**Jinsi:** wuxuu ka khuseeyaa sida aan ka dareeno gudaheena wixii khuseeya jinsigeena (ama sida aan isu aragno nin, naag, ama qof-jisigiisa la bedelay). Qofka aan nahay mar walba lama mid aha sinjigeena. Dadka qaarkood waxay dareemaan inay ku dhasheen jir qalad ah. Sidii aan horay uga wada hadalay, **bedelaada ama jinsiga la bedelay** waa dadka jinsigoodu ka duwan yahay jinisga ay ku dhasheen (ama xubnaha galmood jireed), waana lagu aqbalaa siday yihiin oo ah qayb ka mid ah bulshadeena.

**Galmada:** waxay ku saabsan tahay cidda aan ka hello cida aan jecelahay. Galmoodkeenu waa ka duwan yahay jinsigeena. Dadka badankiisa, haddii ay dhasheen nin, waxay ka helaan oo jecel yihiin naag. Sidoo kale, hadday u dhasheen naag, waxay ka helaan nin waxayna jecel yihiin nin. Kuwaasi waa kuwa **ka hella kuwa dhigooda ah**.

Laakiin waxaa jira dad ka hella oo jecel dadka ay isku nooca yihiin. Ninku xiriir ayuu la yeellan karaa nin (**khaniis**) naagtuna naag ayay xiriir la yeellan kartaa (**khaniisad**). Dadka qaar baa ka hella ragga iyo dumarka labadaba (**waxba ma-cafiye**), dadka qaarkiisna waxay ka hellaan dhamaan sinjiga (**galmood fura**n) kuwaas dhamaantood waxay qayb ka yihiin uumiyaha.

Iyada oo gaaban, abuurka aan nahay ama qofka aan nahay ama jinsiga, lab ama dhedig kaan nahay wuxuu qayb ka yahay midka aan nahay. Waa laga yaabaa in aan ka duwanahay, laakiin waa in aan ula dhaqanaa qof walba kalgacal iyo ixtiraam sababtoo ah waxaan nahay bini-aadam.

## Khuraafaadka ku meegaarsan bulshada LGBTIQ

Waxaa jira is maandhaaf tira badan oo ku maageersan bulshada LGBTIQ. Kuwaas waxaa ku jira:

*"Dad ayaa noqda LGBTIQ sababtoo ah waxaa ku qalqaaliyey kuwa kale."*

Arintaasi run maaha. Ma jirto caddayn kaalmaynaysa malahaas. Saaxiibkaa iyo xubnaha ka mid ah qoyska waxaa laga yaabaa in aanay kuu sheegin waxay yihiin sababtoo ah ma yaqaaniin sidaad uga falcelinayso. Dad badan ayaa ka baqa in ay nacayaan qoyskooda iyo saaxiibadood, mana rabaan inay lumiyaan iyaga. Xubin ka mid ah qoyska ama saaxiib waxaa laga yaabaa in aanay kuu sheegin ilaa ay ku aaminaan. Mar walba waa ogaayeen waxay yihiin, la joogida dad kale oo ah LGBTIQ ayaa siin kara dhiiranaan iyo awood ay ku noqdaan cidda ay yihiin. Sababtaas darteed, cid ku qalqaalisay ma jirto, laakiin la jirida kuwa kale oo LGBTIQ ayaa ka dhigi kara inay dareemaan amaan, la qabalo lana jeclaado.

*"Dadka LGBTIQ ah waxaa ku dhaca jira nafsiyeed."*

Dad badan ayaa u malaynaynaya in LGBTIQ macneheedu tahay inay qabaan dadkaani jirooyinka maanka. Ururka Caafimaadka Adduunku ee loo yaqaan WHO uma aragto dadka isku jinsiga ah oo iska helaa inay qabaan jiro maskaxeed. Dad badan oo ka tirsan LGBTIQ ayaa kala kulmay nacayb dadka kale. Tani waxay ahaan kartaa mid jireed sida garaacida inay yihiin LGBTIQ darteed mid shucuureed, sida dad xamanaya iyaga isla markaana joojinaya inay saaxiib la noqdaan. Tani waxay abuuri kartaa cadaadis maskaxeed. Dhibtu waxay ka imanaysaa dabeecada qaldan iyo nacaybka ku wajahan dadka ka tirsan LGBTIQ, mana aha sababtoo ah qof ahaan waxay yihiin.

*"Dadka ayaa doorta inay noqdaan LGBTIQ."*

To Inaad tahay LGBTIQ maaha wax la doorto, laakiin kuwa badan oo dadka LGBTIQ ah ayaa og cidda ay yihiin waqtigay yar yihiin. Si kasta ha ahaatee, kuwa badan oo ka tirsan LGBTIQ ayaa go'aansada in aanay u sheegin cidna waxay yihiin sababahaan dartood:

- Waxay ka baqayaan in qoysaskooda iyo saaxiibadood ay gooyaan;
- Waxaykabaqayaaninbulshadoodugooyaan;
- Waxay ka baqayaan in dadka ay la shaqeeyaan ay wax ka sheegaan, ama in shaqada laga saaro;
- Waxay ka baqayaan in dadka aanay aqooni ay wax yeellaan jir ahaan, af ahaan iyo shucuur ahaan.

Inaad noqoto LGBTIQ maaha waxaad doorato; waa qayb ka mid ah qofkaad tahay. Dadka LGBTIQ waxay la mid yihiin qof kasta oo kale. Sababtaan darteed, dadka LGBTIQ ah waa in ay ku noolaadaan cabsi la'aan waana in loola dhaqmaa si ixtiraam iyo Sharaf leh.

*"LGBTIQ maaha inay noqdaan waalidiin ama la shaqeeyaan carruur."*

Waxaa jira dadka qaarkiis oo u malaynaya in LGBIQ ay yihiin kuwa wasakhaysan mana aha inay carruurta ag joogaan. Ma jirto cilmi baaris sheegaysa in carruurta LGBTIQ ay noqonayaan LGBTIQ. Waxaase jirta, daraaso muujisay in carruurtaasi ay yihiin kuwa soo dhoweeya dadka iyada oo aan ku xirnayn sinjigooda iyo galmada. Macalimiinta iyo waalidiinta waa in la baraa aqbalaada iyo ula dhaqmida dadka kale si ixtiraam iyo jacayl leh.

*"Dadka LGBTIQ waxay ka soo horjeedaan dabiiciga."*

Waxaa jira dad yiraahda inaad tahay LGBTIQ waxay ka soo horjeedaa dabeecada. Taasi run maaha:

- Sida waafaqsan sayniska, nooli badan ayaa leh kuwa isku sinji ah oo isu galmooda waxaana loo arkaa qayb ka mid ah kooxda;
- Inaad u dhalato labeeb waa xaallad dabiici ah;
- Dadka la bedelay iyo sinjiyada kala duwan waa ogyihiin ilaa markay yaraayeen in sinjigoodu ka duwan yahay jirkooda.
- Intii la noolaa, waxaa jiray sheekooyin la xiriiray cilaaqaadka dadka isku jinsiga ah, dadka jecel sinjiga cagsigooda ah iyo

dadka labeebka ah ayaa door muhiima ka qaata bulshada dhexdeeda loona aqbalay inay bulshada ka mid yihiin.

Inaad tahay LGBTIQ waa qayb ka mid ah dabeecada. Taas darteed, dadka LGBTIQ ah waa in loola dhaqmaa si ixtiraam iyo qadarin leh iyada oo aan wax la yeellayn ama la takoorayn marka laga eego xuquuqda aadamiga.

## LGBTIQ Australiya gudaheeda

Australiya gudaheeda, waa sharci daro in la takooro dadka sabab la xiriirta inay qayb ka tirsan yihiin bulshada LGBTIQ. Xeerka takoorida Sinjiga iyo Wax-ka-bedelka Takoorida Jinsiga (1984) iyo Takoorida Sinjiga Wax-ka-bedelka (Wacgelinta Sinjiga, Aqoonisga Sinjiga iyo Xaallada Labeebka) Xeerka Biilka 2013 ee qaanuunada Federaalka kaas oo ilaaliya dadka isu arka LGBTIQ in la takooro qofka ay yihiin darteed.

Laakiin dad ka tirsan LGBTIQ ayaa weli waxa ku dhaca nacayb iyo takoorid dadka ay yihiin darteed iyo cida ay jecel yihiin. **Waa sharci daro in la takooro, wax la yeello, la xanuujiyo sababtoo ah waa LGBTIQ**. Waxyeellidu waxay noqon kartaa:

- Rabshad jireed: waxaa ka mid ah candhuufa ku tufid, dharbaaxo, riixid, takhantakhayn, iyo in jir ahaan wax la yeello.
- Rabshada shucuureed: waxaa ka mid wax ka sheegida, ka sheegida hadalo aan laaqi ahayn, xamashada, diidida in lala hadlo iyo daandaansiga.

Australiya gudaheeda, xuquuqda LGBTIQ waa la ilaaliyaa sharci ahaan. Waxaa waajiba in aan ula dhaqano dadka LGBTIQ ah si Sharaf iyo ixtiraam leh, kana madax banaan takoorida iyo waxyeellaynta. Tani waa in la socotaa xuquuqda aadanaha.

Haddii aad qabto walaac ku saabsan takoorida ku salaysan LGBTIQ ahaanta, waxaad la xiriiri kartaa:

Australian Human Rights Commission
Guddiga Xuuuqda Aadnaha Australiya
GPO Box 5218, NSW 2001
1300 656 419
www.humanrights.gov.au/our-work/lgbti

Ama, la xiriir Guddiga Xuquuqda Aadanaha (Human Rights Commission) oo ku yaalla Dawlad Goboleedkaaga iyo Territorigaaga:

| |
|---|
| **Victoria**<br>Victorian Equal Opportunity & Human Rights Commission<br>(Guddiga Xuquuqda Aadanaha & U-siinaanta Fursadaha ee Fiktooriya)<br>1300 292 153<br>https://humanrightscommission.vic.gov.au |
| **New South Wales**<br>Anti-Discrimination Board of NSW<br>(Guddiga Lidka Takoorda ee NSW)<br>1800 670 812<br>www.antidiscrimination.justice.nsw.gov.au/ |
| **Queensland**<br>Queensland Human Rights Commission<br>(Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Queensland)<br>1300 130 670<br>https://www.qhrc.qld.gov.au/ |
| **South Australia**<br>Equal Opportunity Commission SA<br>(Guddiga U-sinaanta Fursadaha ee SA)<br>(08) 8207 1977<br>https://eoc.sa.gov.au/ |
| **Western Australia**<br>Equal Opportunity Commission WA<br>(Guddiga U-sinaanta Fursadaha ee WA)<br>(08) 9216 3900<br>http://www.eoc.wa.gov.au/ |
| **Tasmania**<br>Equal Opportunity Tasmania<br>(U-sinaanta Fursadaha ee Tasmaaniya)<br>(03) 6165 7515<br>https://equalopportunity.tas.gov.au/ |
| **Northern Territory**<br>Northern Territory Anti-Discrimination Commission<br>(Guddiga Lidka-Takoorida ee Northern Territory)<br>1800 813 846<br>https://adc.nt.gov.au/ |
| **ACT**<br>ACT Human Rights Commission<br>(Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee ACT)<br>(02) 6205 2222<br>https://hrc.act.gov.au/contact-us/ |

Waxaa qoray oo dib u saxay Budi Sudarto iyo Maria Pallotta-Chiarolli, Guddiga AGMC.